



Cotham School, Cotham Lawn Road,
Bristol, BS6 6DT
Headteacher: Ms Jo Butler
t: 0117 919 8000
e: info@cotham.bristol.sch.uk
www.cotham.bristol.sch.uk

Ardayga qaaliga ahaw

Markay caalamka ka dhacaan waxyaabo waaweyn, caadiyan waqti ayaan gelinnaa iskuulka ayaan uga hadalnaa, uga doodnaa oo waxaana qorshaynnaa sidii aan ficil uga sameyn laheyn. Waxa ayna taasi ka dhacdaa shirarka, xisada macallinka gaarka ha, cashirada caadiga ah, dariiqyada iyo barxadaha lagu cayaaro. Wax laga xumaado waxaa ah, inaan intaa la sameyn Karin hadda. Hadaba, aad ayey muhiim u tahay in laga hadlo waxyaabaha ka dhacaaya Maraykanka iyo meeshan guryaheenna u dhow ee UK.

Waa muhiim inaan ka xishoon sheegidda run dhab ah. Hadaba, waa inaan xirannaa aqoon taas oo na siinaysa awood aan ugu sameynno isbedel joogto ah adduunkan u oynaya in dadku ka aamusin caddaalad darrada iyo naxariis darrada.

Waanu ognahay inay ka dhexdhacaan dadka kala duwan ficillo naxariis darro ah iyo handadaad mar mar kaanoo kale, waxaase muhiim ah in la joojiyo oo aan si wada jir u wada noqonno dad hal iskuul ka wada tirsan. Si kastaba ha ahaatee, dilkii dhowaa ee qaabka darnaa ee George Floyd, Ahmaud Arbrry iyo Beonna Taylor ma aha wax hal mar ku dhacay dadka madow balse waxa ay tani mar kale iftiimisay midab kala sooca, gacan ka hadalka iyo kala qoqobka si joogto ah ugu dhaca dadka laga tirada badan yahay ee madowga iyo aasiyaanka ah (BAME). Waxaannu rabnaa inaan aqoonsanno in aysan aheyd masuuliyadda ardayda madow iyo shaqaalaha inay ka hadlaan baahida loo qabo in la sameeyo isbedel ku dhaca mujtamaca, qaab dhismeedka maamulka iyo heyadaha si loo baabi'yo cunsuriyadda, masuuliyaddaasina wey na wada saran tahay. Nidaamyadaan ma jabna balse si ula kac ah ayaa sidaas loogu sameeyay hadaba waa inaan dib u habeyn ku sameynaa oo aan gilgilnaa. Waa inaan noqonnaa geesiyaal si aan wax uga qabanno jiridda dhibka oo aanan ka xishoonin dooddaha aanan ku xiiso gelinaynin.

Diiraddu waxa ay hadda saaran tahay cunsuriyadda dalka Maraykanka laakiin UK cunsuriyaddu waa dhib la mid ah kan Maraykanka. Meelaha qaarkood cunsuriyadda ingiriiska waa mid aanan muuqan oo dahsoon. Dhinaca kale waxaan heysannaa tusaalooyin aan fiirin karno: sida musiibadii Grenfell Tower, ceebihii Windrush, sida xad dhaafka ah ee dadka ku yar dalka (BAME) loogu sameeyo baaritaanka qofka la joojiyo oo la baaro isagoon denbi lagu ogeyn, toogashadii Mark Duggan oo ay boolisku toogteen 2011kii oo iyadu dhalisay mudaaharaadyo dalka oo dhan ka dhacay, dilkii Stephen Lawrence amaba tusaalooyin kale oo naxariis darro ah oo ay sameeyeen kuwa awoodda heysta. Cilmi baarid ay heyadda caruurta ee loo yaqaan NSPCC sameysay waxaa lagu ogaadhay in xadgudubka midabka ku saleysan iyo hanjabaadda ee ay ilmaha BAME la kulmaan ay korortay qiyaastii 1/5 laga soo billaabo 2016 oo ah markii UK u codeysay Brexit. Sidoo kale, inta uu socdo cudurka Coronavirus oo ku sii fidaya caalamka oo dhan, waxaan ognahay in dadka BAMEka ah ee UK iyo Ameerika inay qatar dheeri ah ugu jiraan cudurka, dhimashada, tacsida, taasoo aan celceliskaas oo kale aanan lagu arkin Afrika, Aasiya iyo wadamada Yurub oo ay joogaan BAME tiro fiican ah. Waan dareensannahay in welwelkaan caafimaadka ku saabsan uu sii xoojinayo welwelkii jiray, culaysna u keenaayo dhammaan dadkii iskuulka khaasatan qoysaska BAMEga ah.

Maba u baahna in la sheego in naf oo dhan ay muhiim tahay, balse hadda waa inaan garab istaagno #blacklivesmatter, sababtoo ah nolosha dadka madow ayaa qatar ku jirta. Iyadoo ay jirto hoos u dhicii saameynta boqortooyadii ingiriiska, mamnuuciddii is addoonsiga ee 1800kii, dhaqdhaqaaqii



Cotham School: a charitable company limited by guarantee.
Registered in England: Company Number 07732888.
Registered Office: Cotham School, Cotham Lawn Road, Cotham, Bristol BS6 6DT



Cotham School, Cotham Lawn Road,
Bristol, BS6 6DT
Headteacher: Ms Jo Butler
t: 0117 919 8000
e: info@cotham.bristol.sch.uk
www.cotham.bristol.sch.uk

xuquuqda dadka ee 1960, soo saaritaankii sharciyada cunsuriyadda looga hortayo iyo soo gunaanadkii kala sarraynta South Africa ee 1994, cunsuriyadda iyo midab takoorka ay la kulmaan dadka BAMEka ah waa mid muddo dheer jira oo si laga naxana u taagan.

Waxaa kaloo muhiim ah inuu hadda qof kasta ka fikiro waxa sida gaarka u heystaan. Tani waa wax adag, laakiin haddaad caddaan tahay, hadaba, waa muhiim inaad fahanto macnaha ka danbeeya erayga mudnaanta caddaanka 'White privilege', eray laga yaabo inaad maqashay, macnihiisuna ma aha inay nolashaadu aheyd mid dhib yar; waxayse macnaheedu tahay In midabka jirkaadu uusan ka dhigeynin wax ka sii dhib badan. Mudnaanta caddaanku waa jiraa waana wax ay si toos ah u sababeen taariikh iyo cunsuriyad jooqta ah, u janjeerid iyo hab dhaqan loo dhisay in lagu ciqaabo kuwa loo arko inay muuqaal ahaan ay ka duwan yihiin dadka badankooda. In la fahmo arintaani dhammaanteen ayey naga caawinaysaa in laga qeyb galo doodda iyo wixii muhiimka ahaa in la sameeyo sidii loo billaabi lahaa waxyaabaha abuura iyo saameynta cunsuriyadda. Cotham waxaan badanaa sheegnaa inaan saaxiib nahay laakiin eraygaasi waa mid aan qiimo laheyn haddii aanu ficil la socon. Saaxiib ahaanshaha macnaheedu waa, marka xigta ee aad ma qasho qof ku dhahaya wax cunsuriyad ah qof BAME ah, inaad hadasho oo aad kala dooddo isla markaasba ama goor danme aad u sheegto qof weyn wixii dhacay. Xaq u dirirtii Angela Davis ayaa si caan baxday u tiri: "Bulsho cunsuriyiin ah dhexdooda, inaad cunsuri aheyn naftirkaadu ma ku filna ee waa inaan ahaanno kuwa cunsuriyadda ka soo horjeeda." Taas macnaheedu waxey tahay, ficil la'aantu kuma filna. Inaad cunsuriyadda ka soo horjeedo kuma filna. Waxaannu u baahannahay inaan helno qaab aan u ahaan karno kuwo cunsuriyadda ka soo horjeeda oo ficil ku dara.

Waanu ognahay in caddaalad darrada keentay mudaaharaadka caalamka oo dhan ay kaa careysiyeen ama aad ku jahwareertay; Waana wax laga caroodo qaar badan oo idinka mid ahna ay rabaan inay wax ka sameeyaan. Qaar idinka mid ah waxaa laga yaabaa inay rabaan inay qeyb ka noqdaan mudaaharaadyada soo socda ee Bristol si loo maqlo codkooda. Mudaaharaadyo nabdoon waa muhiim balse, ma hilmaami karno inaan ku dhex jirno xilli uu jiro cudur caalami ah waana muhiim in dadku kala dheeraado. Dad badan oo aanan kala dheeraanaynin waxa ay si aanan ula kac aheyn u sii faafin karaan cudurkii. Haddii aad doorato inaad mudaaharaado adigoo waalidkaa la socda ama daryeelayaashaada, fadlan isku day inaad naftaada iyo tan dadka kaleba aad badbaadiso. Halkan waxaa ku jira [qaabab](#) aad u qeyb noqon karto waxa socda oo aad nafsaddaadana wax u sii fahansiin karto. Haddii aad rabto caawinaad amaba aad ku dhibtooto waxyaabahaan, waxaa jira dad badan oo ku caawin kara iskuulka iyo bulshada dhedooda: Halkan [RIIX](#) si aad u aragto caawinaadda diyaarka ah. Waxaa laga yaabaa inaad aragtay Raisul wasaaraha Canada, Justin Trudeau, oo si aan caadi aheyn u aamusnaa 20 ilbiriqsi intii uusan ka jawaabin suaal weriye weydiiyay oo ku saabsaneyd waxa ka dhacaaya dalka Maraykanka hadda. Wuxuu in badan u aamusnaa inuu jawaabtiisa aad uga fikiro inta uusan hadlin. Jawaabtiisa waxa uu ku soo jeediyay dhibaatooyinka ay dadka laga tirada badan yahay ay kula kulmaan dalkiisa markaas ayuu si qiiri leh uga hadlay sidii wax looga qaban lahaa. Waxaan u aragnaa inay taasi muhiim tahay. Wada hadal muhiim ah waa in laga yeeshaa waxyaabaha ay dadka laga tirada badan yahay ay kula kulmaan wadankeenna iyo magaalooyinkeenna; markaas kaliya ayaan arki donnaa isbedel. Dadkeenna iskuulka Cothan ee aadka u fiican waxaa sabab u ah kala duwanaanshaha. Muhiim baad tahay codkaaduna waa muhiim waana kula sii wadeyanaa doodahaan markii aan dib kuugu aragno dhexdeenna. Sanadkii hore, annagu, shaqaaalaha, waxaan si adag uga shaqeyneynaynay sidii loo aqoonsan lahaa u janjeeridda



Cotham School: a charitable company limited by guarantee.
Registered in England: Company Number 07732888.
Registered Office: Cotham School, Cotham Lawn Road, Cotham, Bristol BS6 6DT



Cotham School, Cotham Lawn Road,
Bristol, BS6 6DT
Headteacher: Ms Jo Butler
t: 0117 919 8000
e: info@cotham.bristol.sch.uk
www.cotham.bristol.sch.uk

aanan la dareensaneyn iyo dhibka u sinnaan la'aanta ee dhex yaalla nidaamka waxbarashada, oo xallinta labadooduba ku hayaan welwel muhiim ah iskuulaadka wadanka oo dhan khaasatan kuwa Bristol. Dhammaan shaqaalaha Cotham waxay aad u xiisaynayaan sii wadidda shaqadaan sidaas darteed waxnbarashada aad kala kulmayso Cotham waxa ay noqonaysaa mid aqoonsata oo soo bandhigta taariikhda iyo guulaha bulshooyinka kala duwan ee dadkeenna. Ugu danbeyn, qof kasta oo Cotham jooga waxa uu halkaan u joogaa inuu ku caawiyo hadaba haddii aad rabto inaad waxaan si dheeri ah uga sii hadasho, fadlan nala soo xiriir.

Taxader, naxariiso, badqab

Guddiga madaxda saree ee Cotham



Cotham School: a charitable company limited by guarantee.
Registered in England: Company Number 07732888.
Registered Office: Cotham School, Cotham Lawn Road, Cotham, Bristol BS6 6DT